



**War Saxaafadeed Wafdiga Dowladda Federaalka Soomaaliyeed ee ka soo Qayb galay Shirka Wadatashiga Puntland 15 - 17 Maarso, 2020**

**Garowe, Maarso 20, 2020**

Anagoo ah wafdiga Dowladda Federaalka uga soo qayb galay shirka Wadatashiga Puntland, waxaan War-saxaafadeedkan u qabanay in aan ku caddayno arrimaha soo socda:-

- 1- Waxaan soo dhawaynaynaa go'aanka Madaxwaynaha Puntland Mudane Saciid Cabdullahi Dani uu ku tagayo Muqdisho si uu ula kulmo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed iyo Raisul wasaaraha si loo xalliyo wixii khilaaf ah oo jira.
- 2- Waxaan Madaxwaynaha Puntland ku bogaadinaynaa Qabashada Shirka Wadatashiga.
- 3- Waxaan aaman u soo jeedinaynaa qaybaha kala duwan ee bulshada reer Puntland sida xilkasnimada iyo wax-garadnimada leh ee ay shirka uga qayb qaateen.
- 4- Waxaan soo dhawaynaynaa go'aamada shirka ee ku saabsan midnimada, amniga iyo horumarka Puntland.
- 5- Waxaan diidanahay go'aamada lagu sheegay Warmartiyeedka Qaybta ku saabsan Dowladda Federaalka oo aan ka turjamayn hadal soo jeedintii iyo doodihii Shirka.

- 6- Waxaaan ka xunahay Erayadii Xanafta lahaa ee War-martiyeedku u geestay Dowlad Goboleedyada kale taasoo aan qayb ka ahayn agendihii, hadal soo jeedintii iyo doodihii shirka.
- 7- Ugu danbayntii wafdigu waxa uu rajaynayaa in kulan ka Muqdisho ee Madaxda Federaalka iyo Madaxwaynaha Puntland uu ku dhamaado isfahan, wadashaqayn iyo guul lagu gaaro danta umadda Soomaaliyeed.

-DHAMAAD-